



## **Barnaamijka Waqtiga-Kala-Guurka Bulshadu wuxuu qabanayaa munaasabadiisii iibka dhirta ee labaad(2)**

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland Barnaamijkiisa Xaalada-Kala-Guurka wuxuu qaban doonaa iibkii dhirta ee labaad bisha soo socota oo qeyb ka ah barnaamij ganacsiga oo ardaydu maamulaan.

libkaasi dhirtu wuxuu ka dhici doonaa Xarunta Guddoonka Addeega Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha( ama loo yaqaan Xafiiska Degmada) labo maalmood oo Khamiisa, bisha Abriil 26keeda iyo Maayo 10keeda, laga bilaabo saacadaha 10:30 subaxnimo ilaa 1:00 duhurnimo. Ardaydu waxa ay iibin doonaan dambiil ay ku jraan ubaxyo loogu talagalay Maalinta Hooyada, dhir kala duwan oo ah kuwa sanadlaha ah iyo kuwa xilli kasta, dhirta yaanyada laga beero iyo geeadaha khudaarta laga abuurto, iyo dhirta guryaha la dhigto oo iyaguna aad ka heli kartaan.

Ardaydu waxa ay sidoo kale ka yagleeli doonaa dukaan CTP ee Green Thumb ee cinwaankeedu yahay 6801 SE Ave. labo maalmood oo isku xiga oo ka bilaabman bisha Abriil 26keeda ilaa 28keeda iyo bisha Maayo 7deeda ilaa 12keeda. libka dhirtu wuxuu socon doonaa inta u dhaxaysa 9:00 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo. ,maalmaha Isniin, Tallaado, Arbaco, Khamiis iyo Jimcaha, dhinaca kalena maalmaha Sabtida wuxuu iibku dhici doonaa inta u dhaxaysa 10:00 subaxnimo ilaa 2:00 duhurnimo.

Goobtaasi Green Thump waxa ay bixin doontaan dambiilo ubaxa Maalinta Hooyada, kuwa sanadlaha iyo kuwa xilli walba la isticmaalo, dhirta khudaarta iyo kuwa guryaha la dhigto.

Barnaamijka Waqtiga-Kala-Guurka Bulshada wuxuu u addeega dhallinyarada da' yarta ah ee dhammeystay ugu yaraan afarta sanno ee dugsiya sarre iyaga oo naafo ah ama ay jiraan sababo kale oo kalifaya in la siiyo gargaar dheeraad ah si ay u bartaan xirfado ay ku maareeyaan noloshooda inta ay ku jiraan waqtiga kala guurka ee ay ka baxayaan xilliga da' yarta una noqon lahaayeen kuwo si xor ah noloshooda u maamula.

Lix arday oo ka mid barnaamijka CTP ee Dugsiyada Dadweynaha Portland [ayaa ka hor cadeeyey Xeer Dejiyaasha Gobolka](#) bishii Febraayo xeer caawinaya sidii ay addeega waxbarashada gaarka ah u sii heli lahaayeen.